

# Ma ka Firikaysaa Baadhista Kaansarka Sambabada

*Sameynta Baadhista CT ee Qaddarkeedu Hooseeyo, Sameyn La'aanta Baadhista CT ee Qaddarkeedu Hooseeyo*



For “Considering Lung Cancer Screening” in English, see can-ah-78700.

# Fahmidda Baadhista Kaansarka Sambabada

## Kaansarka Sambabada

Kaansarka sambabodu waa sababata koobaad ee geerida kaansarka ku timaada ragga iyo dumarka labadaba. Sannad walba waxa kaansarka sambabada u dhinta dad ka tiro badan inta u dhimata kaansarada mindhicirka, naasaha iyo qanjidhka xiniinyaha oo la isku daray.

Sigaar-cabbista ayaa ah halista ugu badan ee keenta in la yeesho kaansarka sambabada.



10-kii kaansar ee ku dhaca sambabada 8 ka mid ah waxa sababa cabbista sigaarka.

## Baadhista Kaansarka Sambabada

Ujeedada baadhista kaansarka sambabada waxa weeye in goor hore la helo kaansarka sambabada markaas oo ay ugu fududahay in lala tacaalo. Waxay ku bilaabantaa adiga oo booqda bixiyahaaga daryeelka caafimaadka. Iyada ama isaga ayaa kaala hadli doona inay kuu banaan tahay baadhista kaansarka sambabada ee loo yaqaano sawiridda kombiyuutarka adeegsata (computed tomography) (CT) ee qaddarkeedu hooseeyo.

Dhakhtarkaaga ayaa kaala hadli doona muhimadda:


- raacidda talooinka la soo jeediyo ka-dib baadhista
- iska joojinta sigaar-cabbista
- raacista qorshaha sannadlaha ah ee ku saabsan baadhista.

Baadhista CT waxay isticmaalaysaa qalab gaar ah si sawiro looga qaado jidhkaaga. Baadhista waxa ka soo bixi doona faahfaahin ka tiro badan inta laga helo sawirid raajo oo ah laabta. Bixiyahaaga daryeelka caafimaadku wuxu isticmaali doonaa sawiridda si loo eego inu jiro kaansarka sambabada. Raajadu kuma fiicna baadhista kaansarka sambabada.

## Tilmaamaha Baadhista

Baadhista kaansarka sambabada ayaa lagu taliyaya haddii:

- Ad u dhexeysa da'ha 55 iyo 80 sanno. Medicare ayaa bixin doonta baadhista loo sameynayo dadka da'doodu u dhexeysa 55 iyo 77. Caymiska gaarka ah waxa laga yaabaa inu tan ka beddelan yahay.
- Haddii ad hadda sigaar cabtid ama ad joojisay gudaha 15-kii sanno ee tagay.
- Haddii ad leedahay taariikh sigaar-cabbis oo culus (oo ah 30 baako sannadkii). Tan macnaheedu waxa weeye waxad cabtay hal baako oo ah sigaar maalintii muddo ah 30 sanno ama laba baako maalintii muddo ah 15 sanno.
- Haddii aanad lahayn calaamadaha ama astaamaha kaansarka sambabada.
- Haddii bixiyahaaga daryeelka caafimaadku go'aamiyay in aanad lahayn astaamo neefsasho oo cusub.
- Haddii ad awoodid in lagu daweeyo haddii lagaa helo kaansarka sambabada.
- Haddii ad raali ka tahay in lagu baadho sannad kasta.



© Allina Health System

**Sambabodu waa laba xubno neefsasho oo leh qaab toobin oo ku jira gudaha laabtaada.**

# Anfacyada iyo Halisyada

	<b>Sameynta Baadhista CT ee ah Qaddarkeedu Hooseeyo</b>	<b>Sameyn La'aanta Baadhista CT ee ah Qaddarkeedu Hooseeyo</b>
<b>Anfacyada</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>■ Sida laga soo xigtay Tijaabinta Baadhista Sambabada ee Heer Qaran (National Lung Screening Trial) (NLST), baadhistu waxay boqolkiiwa 20 yareynaysaa halistaada inad u dhimatid kaansarka sambabada.</li> <li>■ Baadhista waxa lagu heli karaa kaansarka sambabada oo ah heerarka ugu horeeya ee ugu fudud in la daweeyo. <ul style="list-style-type: none"> <li>— 4-tii nud ama guntin ugu yaraan 3 ayaa ah kaansar marka la fiiryo 100 nud sambab (goob aan caadi ahayn).</li> </ul> </li> <li>■ Baadhistu ma leh xanuun waxana ay qaadanaysaa wakhti ka yar 1 daqiqad. Booqashadaadu waxay isku-darka qaadanaysaa 30 daqiqadood.</li> <li>■ Kaahfalka ama shucaaca la adeegsaday kuma sii jiri doono jidhkaaga kadbib baadhista.</li> <li>■ Barnaamijka baadhistu wuxu bixiyaa la-talin si lagaaga gargaaro inad joojisid sigaar-cabbista iyo isticmaalka tubaakada.</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>■ Kama walwali doontid natijo ah helitaan been ah. Tani waxay dhacdaa marka wax u eeg yahay kaansar laakiin aanuu ahayn.</li> <li>■ Kuma soo gaadhi doono kaahfal ama shucaac.</li> <li>■ Uma baahan doontid in jadwalkaaga galisid ballamo ama wakhti safar.</li> </ul>
<b>Halisyo</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>■ Waxa laga yaabaa in baadhistu keento natijo ah helid been ah. Tani waxay dhacdaa marka wax u eeg yahay kaansar laakiin aanuu ahayn. <ul style="list-style-type: none"> <li>— Qiyaastii 4-tii qof 1 ayaa heli doono natijadan. Waxa laga yaabaa in qofkaasi u baahdo ama aanuu u baahan baadhitaano ama habab dheeraad ah oo lagu xaqiijinayo in kaansar aanuu jirin.</li> </ul> </li> <li>■ Waxa laga yaabaa in baadhistu keento waayid been ah. Tani waxay dhacdaa marka baadhistu aanay muujin in kaansarka sambabodu jiro iyada oo laga yaabo inu jiro. <ul style="list-style-type: none"> <li>— 10-kii qof ee qaba kaansarka sambabada in ka yar 1 ayaa heli doono natijadan.</li> </ul> </li> <li>■ Qaddarka faahfalka baadhistu wuxu la mid yahay qaddarka faahfal ee qofka caadiga ah 1-kii sanno ka soo gaadha deegaankiisa.</li> <li>■ Bixiyeyaasha caymiska qaarkood ma dabbiraan kharashka. Waxad u baahan doontaa inad weydiisid bixiyahaaga caymiska si ad u hubsatid.</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>■ Waxa laga yaabaa inad qabtid kaansarka sambabada oo aanad ogayn.</li> <li>■ Waxa laga yaabaa inad qabtid walaac ka imanaya oggaansho la'aanta inad qabtid kaansarka sambabada iyo in kale.</li> <li>■ Haddii ad qabtid kaansarka sambabada, waxa laga yaabaa: <ul style="list-style-type: none"> <li>— in aanad awoodin in lala tacaalo marka u yahay heerarkiisa ugu horeeya</li> <li>— inad u oggolaatid inu ku fido qaybaha kale ee jidhkaaga</li> <li>— inad kordhisid suurtogalka inad u dhimatid kaansarka sambabada.</li> </ul> </li> </ul>

# Fahmiddayda

Su'aalo	Jawaabo
Haddii an ka soo baxayo qoddobada baadhista CT, intee in leeg ayaan ka faa'iidi doonaa?	Sannadii 2011, waxay NLST ogaatay in baadhista CT ay boqolkii 20 hoos u dhigto geerida ka timaada kaansarka sambabada ee tu timaada dadka si culus sigarka u cabba.
Baadhista CT ee qaddarkeedu hooseeyo ammaan ma ii tahay?	<ul style="list-style-type: none"> <li>■ Baadhista CT ee qaddarkeedu hooseeyo waxay goobo yaryar ama guntinno ama kuuskuus ka heli doontaa ugu yaraan 1 ka tirsan 4-tii qof ee la sawiro. Badi guntinnadaasi ma aha kaansar.</li> <li>■ Waxa jira soo gaadhis kaahfal oo xoogaa ah oo ka imanaysa baadhista CT ee qaddarkeedu hooseeyo. Waxay qiyaastii u dhigantaa soo gaadhista kaahfalka qofka caadiga ahi ka soo gaadha dabeeecadda ama deegaanka gudaha 1 sanno.</li> </ul>
Baadhistu ma waxay tahay ikhtiyaarka kaliya ee lagu gargaaro karo in laga hortago kaansarka sambabada?	Maya. Baadhistu ma joojiso in kaansarka sambabada yimaado. Kaliya way heli kartaa. Habka 1-aad ee lagu yareyn karo halista kaansarka sambabada waa adiga oo aan cabbin sigaar ama joojiya sigaar-cabbista.
Ma waxay tahay in baadhis la ii sameeyo isla ka-dib marka an la kulmo bixiye daryeel caafimaad? Immisa jeer ayaa lagu taliyaa in la sameeyo baadhista?	Waxa laguu sameyn karaa baadhista isla maalinta booqadashada ad la leedahay bixiyahaaga daryeelka caafimaadka. Waxa kale oo ad dooran kartaa inad qaadatid wakhti dheeraad ah oo ka soo fikirtid ikhtiyaaradaada. Waa inad sii wadid in laguu sameeyo baadhisyo la-sii-socod ah sannad kasta.
Maxaa dhaca haddii baadhis yadu ay muujiyaan guntin ama kuus sambab ama wax kale oo aan caadi ahayn oo ku jira gudaha ama dibadda sambabka?	Wada-jir, adiga iyo bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa ka wada hadli doona natijjooyinka oo dejin doona qorshe ay ku jiri karaan ama aanay ku jirin baadhitaano iyo habraacyo dheeraad ah.
Kharashka baadhista CT ee qaddarkeedu hooseeyo ma waxa bixinaya caymiska?	Medicare ayaa kharashka baadhista ka bixin doonta dadka ah da'aha u dhexeeya 55 iyo 77. Qorsheyaasha caymis ee kale si kale ayay noqon karaan. Wac bixiyahaaga caymiska si ad u ogaatid waxa lagu dabbirayo qorshahaaga caymiska.

# Doorbidkayga

Su'aalo	Fikradahayga
Marka ad ka fikirtid halisyada suurtogalka ah, waa maxay cabsiyadaadu ama walaacyadaadu?	
Ma kuu kala cad yihiin anfacyada iyo halisyada ikhtiyaar kasta? Maxaa adiga kuugu muhiimsan?	
Ikhtiyaaradan, wakhtigan, waa kee ka ad dareensan tahay inu sida ugu fiican ku aadan yahay hadafyadaada la-tacaalista?	
Ma jiraa wax laga yaabo inu kaa horjoogsado inad tan sameysid?	
Ma dareensan tahay inad haysatid taageero iyo macluumaad kugu filan?	

## Doorbidkaygu Wakhtigan

- waa in la ii sameeyo baadhista    aan la ii sameyn baadhista    go'aan ma gaadhin

# Tallaabooyinka Xiga

## Dabbiraadda Caymiska

Anfacyada daryeelka caafimaadku way isbeddelaan waxana jirta in qorsheyaasha kala duwan iyo bixiyeyaasha kala duwan ay tan ku kala duwan yihiin. Waa muhiim inad fahamtid anfacyadaada daryeelka caafimaadka ka-hor baadhistaada.

Fadlan wac bixiyahaaga caymiska oo soo si sax ah u soo ogow waxa la dabbiro iyo waxa aan la dabbirin ee hoos yimaada qorshahaaga, iyo inta lagaa rabo inad adigu iska bixisid. Lambarka telefonka ka fiiri kaadhkaaga xubinnimada.

Weydii bixiyahaaga caymiska haddii ad qabtid wax ah su'aalo ku saabsan dabbiraaddaada.

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

# Illo iyo adeegyo

## Allina Health

- [allinahealth.org/LungCancerWhatIsIt/](http://allinahealth.org/LungCancerWhatIsIt/)
- [allinahealth.org/stop-smoking-programs](http://allinahealth.org/stop-smoking-programs)
- [allinahealth.org/stop-smoking-medications](http://allinahealth.org/stop-smoking-medications)
- [allinahealth.org/quit](http://allinahealth.org/quit)

## Virginia Piper Cancer Institute (Machadka Kaansarka)

- Abbott Northwestern Hospital  
612-863-0200
- Mercy Hospital  
763-236-0808
- United Hospital  
651-241-5111
- New Ulm Medical Center  
507-217-5011

## Heer Qaran

- American Cancer Society (Ururka Kaansarka ee Maraykanka)  
[cancer.org](http://cancer.org)
- American Lung Association (Isbahaysiga Sambabada ee Maraykanka)  
[lung.org](http://lung.org)
- A Breath of Hope Foundation  
[abreathofhope.org/screening/](http://abreathofhope.org/screening/)
- Medicare  
[medicare.gov](http://medicare.gov)
- National Cancer Institute (Machadka Kaansarka ee Qaranka)  
[cancer.gov](http://cancer.gov)
- National Cancer Society (Ururka Kaansarka ee Qaranka)  
[americancancerfund.org](http://americancancerfund.org)



AllinaHealth

[allinahealth.org](https://www.allinahealth.org)